

Isu Diyaarinta Maalmaha Barafka!

Macluumaadka Muhiimka ah ee Gaadiidka Waxyaabaha Qoysaska Samayn Karaan si ay Isugu Diyaariyaan

Waxda Gaadiidka Dugsiyada Dadweynaha Denver (Denver Public Schools Transportation Department) waxay halkaan u jooftaa in ay cunugaada siiso gaadiid ammaan ah oo lagu tago dugsiga loogana soo noqdo. Waxaan soo saarnay Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo (Frequently Asked Questions) ee soo socda iyo talooyinka ammaanka si laguugu kaalmeeyo isu diyaarinta cimilada qaboobaha

Su'aalaha Badanaa Leys Weydiiyo

Q: Maxay tahay sida ugu fiican ee lagu ogaado xeritaanka dugsiga marka cimilada darran tahay?

A: Si laguugu daneeyo, DPS waxay adeegsataa siyaabo badan ay ku soo gudbisno macluumaadka ku saabsan xeritaanka dugsiga:

- Booqo www.dpsk12.org. Waa meesha ugu horeyso ee lagu soo dhajiyo xeritaanka dugsiga.
- Wac (720) 423-3200. Waa nambarka telefoonka dhexe DPS ee lagu dhaafi doono fariinta ugu dambeyso haddii lagu fakaro in la xero dugsiga ama marka la hirgeliyo.
- Daawo wararka deegaanka. Inta badan TVyada waxay sheegaan in la xeri doono dugsiga habeenka ka horeeyo ama subaxnimada.

Q: Haddii dugsiga uu furan yahay hase ahaatee basaska soo daahaan taasoo ugu wacan cimilada qaboobaha, ma loo sheegi doonaa qoysaska?

A: Haddii basaska soo daahaan in ka badan 15 daqiiqo, macluumaadkaan waxaa la soo gelin doonaa telefoonka Gaadiidka (720) 423-4699.

Q: Haddi dugsiga xeran yahay, ma jiri doonaa gaadiid lagu tago saacdaha dambe dugsiga?

A: Ma jiri doono gaadiid maalmaha dugsiyada la xero.

Waanada Ammaanka Baska Cimilada Qaboobaha

Hubso haddii uu xeran yahay! Booqo www.dpsk12.org, wac (720) 423-3200 ama daawo wararka TVga si aad u ogaatid haddii dugsiga la xeray. Haddii aysan sidaas ahayn, hubso in aad sameysid dhamaan inta soo socoto:

- **Si kulul u labiso!** Ardayda waa in ay soo qaataan labiska cimilada qaboobaha, kana mid ah koodadka, koofiyadda, gacan gashadka, iyo kabaha loo qaato qaboobaha.
- **Dareemanaaw!** Ku dhiirigeli ardaygaada in uu 'Joogsado, Fiiriyo iyo in uu Dhageysto' marka uu socdo iyo marka uu ka gudbaayo jidadka. Daboolka madaxa, maqalka lagu surto madaxa iyo telefoonada waxay ardayda ka sii jeedin karaan baabuurta ku wareegsan.
- **Qabso waqti badan!** Marka cimilada aad u qabowdo, waxaa dhici karto in ardayda sugaan ilaa baska ka yimaado meesha laga raaco. Taasi waxay dhalisaa in ardayda ka daba ordaan baska, taasoo halis ah, ama baska ku kallifaan in uu sugo. Tan waxay keeni kartaa daahid dheeraad ah, oo ardayda kale ku kallifta in ay muddo dheer ku sugaan qaboobaha.
- **Sug ilaa baska ka istaago!** Ardayda waa in ay sugaan ilaa baska ka istaago si dhamaystiran ka hor inta aysan u dhaqaaqin dhanka baska si ay u koraan ama ka hor inta aysan istaagin si ay uga daggaan. Mar kasta, ka taxadir marka aad koreysid ama ka dageysid baska iyo sug calaamadda u bixiyo wadaha baska si aad u martid baska hortiisa marka la koraayo ama laga soo dagaayo.
- **Xasuus meelaha khatarta!** "Meelaha Khatarta" ("Danger Zone") waa agagaarka u dhaw baska; hubso in wadaha baska uu ku arki karo si loo dhowro koridda ama ka daggidda baska.

La Xariir Waxda Gaadiidka:

(720) 423-4699 • <http://transportation.dpsk12.org>

